



## PORLAND PUBLIC SCHOOLS

501 N Dixon | Portland, OR 97227 | [www.pps.net](http://www.pps.net) | [pubinfo@pps.net](mailto:pubinfo@pps.net) | (503) 916-2000

# Isboortiska Jiilaalka: Xusuusin iyo Filasho

Diseember 21, 2022

Qoysaska PPS ee qaaliga ah,

Marka aan isu diyaarinayno xilliga isboortiska ee jiilaalka, waxaan rabnaa inaan la wadaagno dhowr xusuusin daawadayaasheena.

- **Ma keeni kartid boorsooyinka dhabarka.**

Marna boorsooyinka dhabarka laguma ogola gudaha xarunta marka laga qayb galayo dhacdooyinka dugsiyada PPS sida uu dhigayo sharciga PPS. Dugsiyadu waxay baari doonaan boorsooyinka dhabarka, laakiin aad baa loogu dhiirigelinaya inaadan soo keenin boorsooyinka dhabarka ama bacaha waaweyn ee dhacdooyinka.

- **Waxaan lacag ka qaadnaa gelitaanka JV iyo kubbadda koleyga varsity-ga, iyo legdinta varsity-ga.**

Lacagta tigidhka waa:

- Lacagta Tigidhada Kubadda Kolayga: Dadka waaweyn \$6, Ardayda \$2 (ardayda dugsiga sare waa inay muujiyaan ID-gooda arday si ay u helaan qiimaha ardayga)
- Legdanka: Dadka waaweyn \$3, Ardayda \$1 (ardayda dugsiga sare waa inay muujiyaan ID-gooda arday si ay u helaan qiimaha ardayga)
- Dabaasha: LACAG LA'AAN

Waxaan sidoo kale bixinaa baasaska Portland Interscholastic League (PIL) kaas oo loogu talagalay gelitaanka xilli buuxa. Kuwaas waxa kaliya oo la aqbalii doonaa dhacdooyinka PIL mana lagu isticmaali karo goobaha aan ahayn PPS. Lacagta baasaska PIL waa:

- Baaska Xilliga Kubadda Kolayga \$80
- Baaska Xilliga Lagdanka \$25

- **Cunto ama cabitaan banaanka ka yimid lama ogola.**

Tan waxaa ku jira biyo. Waxaa jiri doona cunto iyo cabitaan la iibsan karo inta lagu jiro tartamada.

- **Marka uu qofku galo xarunta ciyaarta, dib uma soo laaban karo haddii uu baxo.**

Nidaamkani wuxuu khuseeyaa ardayda iyo dadka waaweyn labadaba. Musqulaha ayaa laga heli karaa gudaha xarunta.



## PORLAND PUBLIC SCHOOLS

501 N Dixon | Portland, OR 97227 | [www.pps.net](http://www.pps.net) | [pubinfo@pps.net](mailto:pubinfo@pps.net) | (503) 916-2000

- **Waxaan fileynaa saaxibtinimo isboorti oo wanaagsan.**

PIL waxa ay doonaysaa in ay siiso khibrada ugu fiican ee suurtogalka ah qof kasta oo ka soo qayb gala dhacdooyinkeena isboortiska. Inta uu socdo tartanka, dareenka ayaa laga yaabaa inuu kor u kaco, laakiin waxaan filaynaa in daawadayaasheena ay u dhaqmaan si ixtiraam heer sare ah xagga dugsiyada, ciyaartoyda, taageerayaasha, iyo maamulayaasha. Haddii ay jiraan wax walaac ah, fadlan raadso shaqaalaha dhacdada, maamulka ama shaqaalaha amniga si ay gacan uga geystaan xallinta wixii walaac ah. Wuxaan horay ugu mahadcelineynaa taageeradaada marka aad ka soo qeybgasho dhacdooyinka PIL.

Dhammaanteen waan ku faraxsanahay inaan ku taageerno ardaydeena ciyaartooyda jawi ammaan iyo soo dhaweyn leh. Haddii aad wax su'aalo ah qabtid, fadlan la xiriir dugsigaaga.

Waad ku mahadsan tahay taageeradaada,

Dr. Jon Franco  
Madaxa Dugsiyada

Marshall Haskins  
Agaasimaha Sare ee Ciyaaraha Isboortiska